

Barnaamijka Nafaqada ee WIC (WIC Nutrition Program)

WIC waa barnaamij nafaqo oo la siiyo kumanaan kamid ah qoysaska Maine, kaasoo ka caawiya carruurta Maine inay koriimo xoog leh oo caafimaad leh koraan. Gunnooyinka cuntada ee WIC waxaa lagu heli karaa hanaan ku salaysan heerarka dakhliga iyo cilmi baarista nafaqada ee markaas jirta. Webseedkaan wuxuu doonayaa inuu siiyo dhammaan qoysaska Maine talada Nafaqada oo bilaashka ah, tilmaamo ku aadan ilaalinta caafimaadka, iyo khayraadka qoysaska ilmaha korinaaya.



Qofkee codsan kara Maine Barnaamijka Nafaqada WIC ee Maine (WIC Nutrition Program)?

WIC wuxuu u furan yahay qof kasta oo ku nool Maine, ayna ku jiraan soo galootiga ka shaqeyeya Maine. Codsadayaasha ayaa noqon kara qof uun kamid ah dadka soo socda:

- Haweenka uurka leh, naas nuujinaaya ama ilmo dhalay lixdii bilood ee ugu danbeeyay.
- Dhalaanka iyo carruurta jira ilaa shan sano, ayna ku jiraan kuwa la korsaday iyo kuwa dawladu biisho.
- Aabayaasha ayaa u codsan kara carruurtooda.

Sidee ayaan u codsan karaa? Helitaanka gunnooyinka WIC waa wax fudud. Wac [Xafiiska kuugu dhow ee WIC](#) si aad balan u qabsato. Balantaada koobaad waxay qaadanaysaa ilaa hal saac oo waqtigaaga kamid ah - saacad faa'iido u leh adigga iyo carruurtaada inta noloshiina ka dhiman.

Xogta Lagala Xariiraayo Xafiiska Maxaliga ah ee WIC:

Xafiiska WIC ee Gobalka Maine: Laynka bilaashka ah ee Gobalka 1(800) 437-9300 TTY Maine relay 711

Auburn	207-795-4016	Ellsworth	207-667-5304
Augusta	207-626-6350	Machias	207-255-8280
Bangor	207-992-4570	Portland	207-553-5800
Bath	207-442-7963	Presque Isle	207-768-3026
Belfast	207-338-1267	Rockland	207-594-4329
Biddeford	207-283-2402	Sanford	207-459-2942
Calais	207-454-3634	Skowhegan	207-861-3593
East Wilton	207-645-3764	Waterville	207-861-3580

Tilmaamaha U qalmida Dakhliga

Waxay dhaqan galayaan laga bilaabo Luulyo 1, 2023 ilaa Juun 30, 2024

Cabirka u qalmida ee Cuntooyinka "Qiimaha Jaban"

Tirada Qoyska	Sanad kasta	Bil kasta	Labo jeer Bishii	Labadii Asbuuc ba Mar	Asbuuc kasta
1	26,973	2,248	1,124	1,038	519
2	36,482	3,041	1,521	1,404	702
3	45,991	3,833	1,917	1,769	885
4	55,500	4,625	2,313	2,135	1,068
5	65,009	5,418	2,709	2,501	1,251
6	74,518	6,210	3,105	2,867	1,434
7	84,027	7,003	3,502	3,232	1,616
8	93,536	7,795	3,898	3,598	1,799
Xubin kasta oo dheeraad ah oo qoyska kamid ah	9,509	793	397	366	183

Fadlan ogoow: Marka aad go'aaminayso heerka dakhliga bishii, fadlan adeegso shuruudaha soo socda:

Dakhliga asbuuc kasta x 4.333 asbuuc

Dakhliga labadii asbuucba mar x 2.15 asbuuc)